Qofka ka hor yimaada Madaxdiisa, Bulshada Muslimiintana ka dhex baxa ee sidaa ku dhinta, wuxuu ku dhintay dhimasho Jaahili

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Nabiga nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee uu yiri: Qofka ka hor yimaada Madaxdiisa, Bulshada Muslimiintana ka dhex baxa ee sidaa ku dhinta, wuxuu ku dhintay dhimasho Jaahili, Qofka u dagaalama Calan Indho la`aan ah oo Baadil ah, oo uu u caroonayo qabyaalad ama ugu yeeraya qabyaalad, ama u gargaaraya qabyaalad oo ku dhinta dhimashadiisu waa Jaahili, Qofka la dirira ummaddayda, ee garaaca kan Baariga ah iyo kan Faajirka ahba, ee aan ka leexan kan Muuminka ah, ee aan kii balanta lahaa aan u oofin balantiisii, kaasi igama mid aha aniguna ka mid ma ihi".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiye wuxuu cadeeyey in Qofka Madaxda adeeci waaya oo ka baxa Muslimiinta ku midaysan baycada Imaamka, ee sidaa ku dhinta isagoo Jamaacada Musliiinta ka baxay Madaxdiina khilaafay, wuxuu ku dhintay dhimasho Jaahili ah, kuwaasoo Madaxna aan maqlayn, Bulshodana aan ku xirnayn, balse ahaa Firqooyin iyo Kooxo qolaba qolo la dagaasho. Rasuulku nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee wuxuu sheegay in qofka u dagaalama calan aysan u cadayn inuu xaq yahay iyo inuu baadil yahay, oo uu u caroonayo hadii qoladiisu ama qabiilkiisu caroodo, oo uusan u caroon isagoo diinta u gargaaraya ama xaqa u gargaaraya, oo ku dagaalamo qabyaalad indho la`aan iyo cilmi la`aan ah, hadii xaaladaas lagu dilo waxay la mid tahay dhimasho jaahili ah. Nabigu nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee wuxuu sheegay qofkii la dirira ummaddisa ee garaaca qofka fiican iyo kan xunba, ee wuxuu samaynaayo aan dan ka gelin, ee aan ka baqin ciqaabta dilka mu'uminiinta, ee aan ilaalinay balanta dadka lagula jiro sida gaalada balanta ku jooga iyo madaxda balanta lala galay, balse burinaaya balamada, arinkaasi wuxuu ka mid yahay dunuubta waaweyn, Qofkii sameeyana wuxuu xaq u yeelan goodigaas adag.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/58218